



## Child Care Subsidies

Kharashka iyo Tilmaamaha Bixinta Lacagta Xarumaha  
Daryeelka Ilmaha Liisanka iyo Shahaadada Haysta



Washington State Department of  
**CHILDREN, YOUTH & FAMILIES**



Washington State Department of  
**CHILDREN, YOUTH & FAMILIES**

## Macluumaad

Hordhac .....	1
Child Care Subsidy Programs (CCSP).....	1
Barnaamijka Daryeelka Ilmaha Shaqada La Xidhiidha (Working Connections Child Care, WCCC) .....	1
Barnaamijka Daryeelka Ilmaha Xiliyeedka (Seasonal Child Care, SCC).....	1
Daryeelka Ilmaha ee Barnaamijyada Samofalka Ilmaha (Child Welfare Programs Child Care) .....	1
Kaalinta iyo Masuuliyada Bixiyayaashada Xarunta Liisanka Haysata .....	1
Masuuliyada DCYF .....	2
Masuuliyada Qoyska.....	2
Hormarka U Qalanka Daryeelka Ilmaha .....	2
Xarunta La Socodka iyo Sheegashada Xaadiriska Maalin Kasta .....	3
Qiimayaal .....	3
La Socodka Xaadiriska.....	4
Dalabka Sixitaanka.....	5
Gudbinta Dalabka Lacagta .....	9
Helitaanka Lacagta.....	10
Xadiga Daryeelka Ilmaha Laxaadka La' .....	10
Heerka 1.....	11
Heerka 2.....	11
Khaladaad Bixinta Lacagta .....	11
Khaladaad Lacag Yar Siin ah .....	11
Khaladaad Lacag Badan Siin .....	12
Ka Qaadida Kharashka Adeegyada Aan Loo Ogolayn Qoysaska .....	13
Siyaasadaha Qoran.....	13
Macluumaadka Cashuurta .....	13
Ku Xadgudubka Barnaamijka .....	14
Early Achievers.....	14
Khayraadada.....	15
Macluumaadka Xidhiidhka.....	15
Macluumaadka Onleyinka ah.....	15

## Hordhac

Tilmaamahani waxay bixinayaa macluumaadka ku saabsan dalanka kaabista Gobolka Washington ee lacagta iyo lacagta la siiyo xuramaha daryeelka ilmaha liisanka iyo shahaadada haysta. Tilmaamaha waxaa soo saaray oo haysta Washington State Department of Children, Youth & Families (DCYF). La hadal Khadka Bixiyaha ee 1-800-394-4571 hadii aad u baahan tahay kaalmo luuqad kale ah. Turjubaan ayaa kusoo biiri kara taleefanka.

Bixiyayaasha liisanka haysta ee Oregon iyo Idaho ee buuxiyay shuruucda liisanka gobolada waxay u qalmi karaan lacagta kaabista daryeelka ilmaha Gobolka Washington marka ay daryeelayaan caruurta u qalanta ee degan Washington.

## Child Care Subsidy Programs (CCSP)

### Barnaamijka Daryeelka Ilmaha Shaqada La Xidhiidha (Working Connections Child Care, WCCC)

WCCC waxay ka caawisaa qoysaska inay iska bixiyaan daryeelka ilmaha si markaa waalidku uga qayb geli karo hawlaha sida shaqada, tobobarka, barnaamijyada waxbarashada, iyo hawlaha macmiilka ee Kaalmada Kumeel Gaadhka ah ee Qoysaska Baahan (Temporary Assistance for Needy Families, TANF). Bixiyayaasha daryeelka ilmaha ee liisanka ama shahaadada haysta iyo Family, Friend, and Neighbor providers (FFN) waxay u qalmi karaan daryeelka ilmaha ee ay lacagtiisa bixiso WCCC.

### Barnaamijka Daryeelka Ilmaha Xiliyeedka (Seasonal Child Care, SCC)

Barnaamijka SCC waxa uu u adeegaa qoysaska u qalma ee xiliga ka shaqeeya shaqooyinka beeraha. Shaqaale xiliyeedku waxay sidoo kale u qalmi karaan gunooyinka WCCC. Qoysasku waxay dalban karaan barnaamijka ku haboon baahida daryeelka ilmahooda. Kaliya bixiyayaasha liisanka ama shahaadada haysta ayaa u qalma lacagta daryeelka ilmaha ee barnaamijka SCC.

SCC waxay siisaa adeegyada qoysaska u qalma ee degan degmooyinka soo socda: Adams, Benton, Chelan, Douglas, Franklin, Grant, Kittitas, Okanogan, Skagit, Walla Walla, Whatcom, iyo Yakima.

### Daryeelka Ilmaha ee Barnaamijyada Samofalka Ilmaha (Child Welfare Programs Child Care)

Shakhsiyaadka ka qaata adeegyada barnaamijka oo soo mara Employed Foster Parent, Child Protective, iyo Child Welfare waxay u qalmi karaan kaalmo bixinta lacagta adeegyada daryeelka ilmaha. Shaqaalaha bulshada ee Child Welfare ee lagu qoray ayaa buuxinaya u qalanka, keenaya cadaynta, iyo ogolaanshaha bixinta lacagta.

## Kaalinta iyo Masuuliyada Bixiyayaashada Xarunta Liisanka Haysata (Licensed Center Provider Roles and Responsibilities)

Bixiye xarunta liisan haysta ahaan, waxa aad leedahay kaalin gaar ah oo aad ka ciyaarto caruunta ku jirta daryeelkaaga. DCYF waxaa ka go'an inay ka caawiso iyada oo abuuraysa shuruuc gaar ah iyo masuuliyada dhamaan bixiyayaasha.

Tilmaamahani waxay kaa caawinayaan inaad fahanto kaalintaada iyo masuuliyadaada si loo hayo xaadiriska oo loogu dalbado si sax ah bixinta lacagta. Waxaa kugu waajib ah inaad:

1. Buuxiso shuruudaha liisanka xaruynta daryeelka ilmaha Washington
2. Inaad buuxiso shuruucda iyo shuruudaha kaabista daryeelka ilmaha

3. Waxa aad haysataa duwaan xaadiris oo dhamaystiran oo sax ah mudo shan sano ah sida ay dhigayaan shuruucda liisanku
4. Nidaamka haynta duwaanka xaadiriska DCYF ama mid ay DCYF ansixisay
5. Toos ayaa looga qaadanayaa lacagta qoyska ama cida kale ee qoyska ka bixinaysa oo waa in la gaadhsiiyaa DCYF mudo 60 maalmood gudahood ah hadii aan la bixin.
6. Raac dhamaan Xeerarka Maamulka Washington (Washington Administrative Codes, WAC), oo ay ku jiraan WAC 110-15-0034, marka aad dalbanayso lacagta

## Masuuliyada DCYF

- Waxay sheegeysaa oo ay qoraysaa siyaasada iyo shuruucda u qalanka ee CCSP
- Waxay gaadhsiiisaa dawlada federalka ah barnaamijka kaabista daryeelka ilmaha Gobolka Washington
- Waxay kormeertaa xaadiriska iyo duwaanka kharash dalicida si loo qiimeeyo hadii lacag badan la siiyay ama lacag yar la siiyay
- Waxay siisaa qoysaska iyo bixiyayaasha ugu yaraan 10 maalmood oo shaqo wargelin ah marka la yaranayo ama meesha laga saarayo gunooyinka kahor inta aan la gaadhin taariikhda ay ku eeg tahay marka hore ee ku taal Wargelinta Bixinta Lacagta Adeega Bulshada
- Waxa ay si toos ah ula shaqaysaa qoysaska si loo ogaado u qalanka adeegyada daryeelka ilmaha
- Waxay u ogolaataa oo ay u dirtaa lacagta kaabista daryeelka ilmaha bixiyayaasha
- Waxay ka jawaabtaa su'aalaha la xidhiidha u qalanka qoyska, ogolaanshaha iyo bixinta lacagta

## Masuuliyada Qoyska

Qoysaska dalbaday ama heley kaabista CCSP waxaa saaran masuuliyada oo ah shardi ku xidhan helitaanka gunooyinka. Waxa taas kamid ah, laakiin kuma xadidna:

- Buuxinta nidaamka arjiga iyo gudbinta wixii foomam ah ee xaqiijin ah si loo ogaado u qalanka
- Bixinta kharashka ama in la sameeyo qorshaha bixinta oo la raaciyo inta ay dhankooda bixinayaan ee bishii
- Duwaan gelinta xaadiriska ilmaha ee nidaamka xaadiriska ama in qof loo ogol yahay uu keeno ama uu kaxeeyo ilmaha
- Ka warbixinta isbadalaha bixiyayaasha shan maalmood gudahood
- Dalbashada daryeelka dheeraad ah oo hawlaha la ogol yahay ah

## Hormarka U Qalanka Daryeelka Ilmaha

- A. Shakhsiyadka doonaya inay ka caawiyaan bixinta kharashka daryeelka ilmaha waxay la xidhiidhi karaan:
  - Iyaga oo kalasoo hadlaya Xarunta Xidhiidhka Kaabista Daryeelka Ilmaha gobolka oo dhan ee DCYF 1-844-626-8687
  - La xidhiidhaya shaqaalaha bulshada Child Welfare ee ku qoran
  - Ku buuxinaya arjiga onleynka ah [www.WashingtonConnection.org](http://www.WashingtonConnection.org)
- B. DCYF waxay ururisaa oo ay naqdidaa macluumaadka lagu ogaanayo u qalanka qoyska.
- C. Marka u qalanka loo ogaado CCSP, qoysasku waxay ka heli doonaan warqad DCYF. Warqada u qalanka waxaa ku jira taariikhda bilawga iyo dhamaadka u qalanka iyo xadiga wada bixinta bishii.
- D. Qoysaska u qalma waxay isticmaali karaan Answer Phone (1-844-626-8687) si ay u eegaan arjigooda daryeelka ilmaha iyaga oo gujinaya 1 kadib marka ay garaacaan Xarunta Xidhiidhka CCPS. Qoysaska waxaa looga baahan yahay lambarkooda aqoonsiga macmiilka ama Lambarka Amaanka Bulshada oo waxa ay eegi karaan:



- Hadii arjigooda la ogolaaday, diiday ama weli la sugayo
  - Xaalada waraaqaha ay ka heshey DCYF
  - U qalanka taariikhda ay bilaabmayso iyo dhamaanayso
  - Adeegyada daryeelka ilmaha ee la ogol yahay
  - Xadiga wada bixinta bishii
- E. Bixiyayaasha sidoo kale waxay ka eegi karaan xaalada arjiga qoyska iyada oo isticmaalaya Taleefanka Macluumaadka Wixii Shaqada La Xidhiidha (Working Connections Information Phone, WCIP) (1-866-218-3244). WCIP waxa la heli karaa 24 ka saacadood maalintii, todoba maalmood todobaadkii, Ingiriisi iyo Isbaanish. Si aad u isticmaasho WCIP, waxa aad u baahan tahay:
- Lambarka bixiyaha daryeelka ilmaha SSPS
  - Lambarka Aqoonsiga Shaqaalaha (Employee Identification Number, EIN)
  - Lambarka arjiga qoyska ee ku jira wargelinta SSPS
- Maadaama oo ay jirto sirtu, macluumaadka qaar qoyska waxaa dhici karta in aanad heli karin. WCIP waxay kuu ogolaanaysaa inaad eegto waxyaabaha soo socda:
- Xaalada arjiga - la ogolaaday, diiday, sugayo, xidhay, ama geliyay liiska sugayaasha
  - Taariikhda dhaqangalka adeega
  - Adeegyada daryeelka ilmaha la ogolaaday
  - Xadiga qoysku uu bixinayo bishii
  - Wixii fariin gaar ah ee la xidhiidha barnaamijka kaabista
- F. DCYF waxay u dirtaa bushqada dib u dalbashada qoysaska kahor inta ayna dhamaanin mudada u qalanku. DCYF ma bixinayso lacagta daryeelka hore ee mudada u qalanka iyada oo qoyska la ogaado inuu u qalmo moojee. Qoyska ayaa ka masuul ah bixinta kharashka adeegyada daryeelka ilmaha wixii galdalool ah ee u qalanka iyada oo aan laga helin kaalmo DCYF. U qalanka daryeelka ilmaha dib looma celiyo taariikhdiisa marka qoysasku ay dib u dalbayaan kadib marka ay dhamaato mudada u qalanku.

## Xarunta La Socodka iyo Sheegashada Xaadiriska Maalin Kasta

### Qiimayaal

Xadiga kaabista daryeelka ilmaha ee gobolka ee ugu badan waxaa lagu ogaadaa deegaanka gobolka ee daryeelka laga bixiyay (eeg khariirada boga soo socda), da'da ilmaha, xadiga daryeelka loo baahan yahay, iyo nooca daryeelka.

DCYF waxay bixisaa xadiga gobolka ugu badan ama xadiga lacagta gaarka ah la iska bixiyo, kolba ka yar. Waxaa dhici karta in baaqiga soo hadhay aanad ka qaadin qoyska ee xadiga kaabista daryeelka ilmaha gobolka ee ugu badan iyo xadiga aad sida gaarka ah dadka uga qaado.

### *DCYF Waxay Ogolaataa Qaybaha Daryeelka Gelin ama Maalinta oo Dhan*

Hadii aad qaado kharash saacad, todobaadle ama bile, xadigaaga waxaa loogu badalaa gelin iyo maalin dhan qaybo ah sida soo socota:

- Qaybaha gelinka ah waxaa la isticmaalaa marka ilmuhu uu u baahan yahay shan saacadood wax ka yar oo dayreelka ah maalintii
- Maalinta oo dhan qaybaha ah waxaa la isticmaalaa marka ilmuhu u baahan yahay inta u dhaxaysa shan ilaa 10 saacadood maalintii oo daryeel ah

### Saacadii

- Qaybta gelinka maalintii = Xadiga saacadii x 5
- Maalinta oo dhan = Xadiga saacadii x 10

- *Tusaale ahaan:* Hadii aad ka qaado \$3 saacadii, xadigaaga gelinka maalintii waxa uu noqonayaa \$15, oo xadiga maalinta oo dhami waxa uu noqonayaa \$30


Todobaadkii

- Hadii aad qaado xadiga todobaadkii, DCYF waxay u qaybisaa xadiga tirada maalmaha aad furan tahay todobaadkii
- *Tusaale:* Hadii aad furan tahay shan maalmood todobaadkii oo aad ka qaado \$200 todobaadkii maalinta oo dhan, xadiga maalinta oo dhan aad qaadaa waxa weeye \$40

Bishii

- Hadii aad qaado xadi bile ah, DCYF waxay u qaybinaysaa xadiga 22 oo caruurta aan gaadhin da'da waxbarashada iyo caruurta gaadhay da'da waxbarashada ah
- *Tusaale ahaan:* Hadii aad qaado \$450 caruurta aan gaadhin da'da waxbarashada bishii, xadigaagu waxa uu noqonayaa \$20.45 maalinta oo dhan. Hadii aad qaado \$200 caruurta aan gaadhin da'da waxbarashada bishii, xadigaagu waxa uu noqonayaa \$9.09 gelinkii.

### Child Care Subsidy Rates Regional Map



To learn more about subsidized child care in Washington, visit [www.dcyf.wa.gov](http://www.dcyf.wa.gov).

### La Socodka Xaadiriska

Waa inaad isticmaashaa Nidaamka Xaadiriska Elektorooniga ah ee ay bixiso DCYF ama nidaamka xaadiriska elektorooniga ah oo cid kale leedahay oo ay ansixisay DCYF. Marka aad isticmaalayso nidaamka xaadiriska elektorooniga ah, qoyska, ama qofka uu qoysku u ogol yahay, waa inuu duwaan geliyaa taariikhda imaatinka iyo bixitaanka ilmaha ee bixiyaha daryeelka ilmaha oo uu geliyaa nidaamka

xaadiriska elektorooniga ah. Macluumaadka ku saabsan xaadiriska elektorooniga ah waxaa laga heli karaa [www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/electronic-attendance-system](http://www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/electronic-attendance-system).

Bixiyayaasha isticmaala nidaamka gobolka, waa inaad usoo gudbisaa dhamaan xaadiriska maalin kasta adiga oo adeegsanaya nidaamka elektorooniga ah kahor inta aanad u dirin dalab SSPS lacagta ah. Wixii macluumaad ah ee ku saabsan isticmaalka nidaamka gobolka, waxa aad ka eegtaa buuga nidaamka <http://www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/EASManual.pdf>.

## Dalabka Sixitaanka

DCYF waxay dirtaa waraaqaha soo socda marka lagu ogol yahay lacagta kaabista daryeelka ilmaha:

1. Warqada Ogolaanshaha Bixiyaha, oo uu ku qoran yahay xadiga bishii ee la wada bixiyoo, hadii ay jirto, ee lagu leeyahay bishii qoyska
2. Wargelinta Adeega Bulshada
3. Qaansheegta bishii ee dalabka wada bixinta
4. Risiidhka bishii ee lacagta (aalada xawilaada)

Hadii ay warqada la socoto wax khalad ah oo soo socda, la hadal Khadka Bixiyaha DCYF ee 1-800-394-4571 si aad u saxdo:

1. Magaca bixiyaha iyo lambarka bixiyaha SSPS
2. Ogolaanshaha Adeegyada
3. Magaca caruurta
4. Lambarka qaybaha iyo xadiga ilmo kasta
5. Taariikhda bilawga iyo dhamaadka ee ogolaanshaha
6. Xadiga qoysku uu bixinayo bishii

Waxa aad ka heli doontaa Wargelinta Adeega Bulshada marka uu jiro isbadal ku yimaadaa ogolaanshaha ama dhamaadka kaabista daryeelka ilmaha. Si aad ugu hesho wargelinta iimeelka ogolaanshaha bilawga, isbadalada, ama taariikhda dhamaadka, waxa aad kala xidhiidhi kartaa Khadka Bixiyaha DCYF 1-800-394-4571 ama iimeelka [providerhelp@dcyf.wa.gov](mailto:providerhelp@dcyf.wa.gov) si aad u siiso cinwaankaaga iimeelka. Waxa aad macluumaad dheeraad ah ka ogaataa SSPS [www.dcyf.wa.gov/services/ssps](http://www.dcyf.wa.gov/services/ssps).

Qaansheegta waxaa laguugu diray Boosta Maraykanka caadiyan maalinta ka horeysa maalinta ay bishu ku eeg tahay. Qaansheegta ugu horeysa marka ugu horeysa ee la ansixiyo waxay soo gaadhaa ilaa badhtanka bisha xigta. Waxa aad sidoo kale geli kartaa qaansheegaha Daaqada Bixiyaha Websaytka SSPS.

Marka ay kusoo gaadho qaansheegtu, waxa aad eegtaa duwaankaaga xaadiriska elektorooniga ah si aad u ogaato tirada qaybaha ee dalabka bixinta taas oo ku salaysan xaadiriska ilmaha iyo ogolaanshaha. Qaybaha iyo adeegyadu daryeelka waxaad si sax ah u dalban kartaa bixinta lacagta oo ay ku jiraan kuwa soo socdaayi:

### *Maalinta/Qaybaha Daryeelka La Siiyay Ilmo Kasta*

1. **Qaybta Maalinta Dhan.** Qaybta maalinta dhan waxay u dhigantaa 5-10 saacadood oo daryeel ah. Hadii daryeelka la ogolaado oo la bixiyo inta u dhaxaysa 5-10 saacadood maalintii, waxa aad dalban kartaa qaybta maalinta dhan ee maalintaas. Maalmaha uu maqan yahay ilmuhu, waxa aad ka eegtaa maalinta uu maqan yahay qaybta ah ee hoose.
2. **Qaybta Gelinta ah** Qaybta gelinta ah waxay u dhigantaa ilaa 4 saacadood iyo 59 daqiiqo. Hadii daryeelka la ogolaaday oo la bixiyo wax ka yar shan saacadood hal maalin, waxa aad dalban kartaa qaybta gelinta ah maalintaas. Maalmaha uu maqan yahay ilmuhu, waxa aad ka eegtaa maalinta uu maqan yahay qaybta ah ee hoose.

3. **Daryeelka Wakhtiga Dheeraad ah** Caruurta qaar ayaa u baahan karta daryeel wax ka badan 10 saacadood maalintii. Si aad u dalbato daryeelka ilmaha dheeraadka ah, qoysku waxay la xidhiidhayaan DCYF oo waxay u keenayaan waraaqo ay ku tusayaan saacadaha dheeraadka ah ee loo baahan yahay. Waxaa lagu siin karaa lacag dheeraad ah daryeelka noocan ah hadii aad leedahay siyaasad qoran oo kharashka laga qaado ah qoyska iska iskaga bixiya oo ah xadi sare oo daryeelka caruurta ah oo ka badan 10 saacadood maalintii. Gobolka ayaa bixinaya wixii daryeelka ah ee ka dheeraad ah xadiga gelinka maalintii ama xadiga kaabista daryeelka ilmaha ee gobolka ee ugu badan, kolba ka yar, ilaa 15 saacadood. Daryeelka ka sareeya 15 saacadood waxa uu u baahan yahay ansixin kormeer oo waxaa lagu siiyaa xadiga gelinta ama xadiga kaabista ilmaha ee ugu badan, kolba ka yar.

- a. **Hadii ilmahaagu uu joogo daryeelka ilmaha wax ka yar 10 saacadood, oo aan la filanaynin inuu joogo wax ka badan 10 saacadood maalintii, xataa hadii loo ansixiyay wakhtiga dheeraad ah, waxaa dhici karta in aanad dalban karin wakhtiga dheeraadka ah daryeelayaan.**

*Tusaale ahaan: Ilmaha jadwalkiisu yahay ee loo ogolaaday inuu joogo xarunta Isniin - Khamiis laga bilaabo 7:30 subaxnimo - 5:30 galabnimo - 10 saacadood Bixiyayaashu waxay dalban karaan qaybta maalinta oo dhan. Ilmaha waxaa loo ogolaan karaan daryeelka wakhtiga dheeraadka ah, laakiin, ma qorshaysna inuu maalin kasta tago wax ka badan 10 saacadood. Hadii ilmahaagu uu tago 10 saacadood ama wax ka yar daryeelka oo aanay qorshaysnayn inuu tago, xataa hadii loo ogolaaday wakhtiga dheeraadka ah, bixiyayaashu ma dalban karaan wakhtiga dheeraadka ah. Ilmaha jadwalkiisu yahay ee loo ogolaaday inuu joogo xarunta Isniin - Khamiis laga bilaabo 7:30 subaxnimo - 7:30 habeenimo - 12 saacadood. Ilmaha waxaay tahay inuu tago oo loo ogolaaday maalin kasta 12 saacadood oo daryeel ah. Hadii ilmuhu uu tago daryeelka, laakiin, laga kaxeeyo wakhti hore oo uu ka tago wax ka yar 10 saacadood kadib daryeelka, bixiyayaashu waxay dalban karaan maalinta oo dhan iyo sidoo kale wakhtiga dheeraadka ah.*

- b. **Hadii ilmahaaga ay qorshaysan tahay oo loo ogolaaday daryeelka wakhtiga dheeraadka ah laakiin aanu maalinta oo dhan aanu joogin, waxa aad dalban kartaa daryeelka wakhtiga dheeraadka ah ilaa inta ayna ku tan dhaafinaynin.**

*Tusaale ahaan, ilmaha jadwalkiisu yahay inuu joogo xarunta Isniin - Khamiis laga bilaabo 7:30 subaxnimo - 7:30 habeenimo, 12 saacadood, oo waxa uu maqnaa maalinta oo dhan. Bixiyayaashu waxay dalban karaan qaybta maalinta oo dhan ah iyo sidoo kale daryeelka wakhtiga dheeraadka ah.*

#### *Xadiga Qoysku Bixinayo*

Badanaa qoysasku waa inay bixiyaan qaybtooda oo kamid ah kharashka daryeelka ilmaha bishii. Qoyska waxa uu ka masuul yahay bixinta kharashka qaybtooda bil kasta. Qoysku waxay yeelan karaan qayb ay bixinayaan oo lagu qoray bixiye kale, ama waxay u qaybin karaan dhawr bixiye. Hadii lagugu qoro wada bixin, oo aanad helin lacagta, waa inaad ka warbixisaa 60 maalmood gudahood Laynka Bixiyaha DCYF ee 1-800-394-4571 ama iimeelka [providerhelp@dcyf.wa.gov](mailto:providerhelp@dcyf.wa.gov).

#### *Maalmaha Uu Maqan Yahay*

Marka ilmaha loo ogolaaday kaabista uu tago ugu yaraan hal maalin bishii mudada loo ogol yahay, waxa aad u qalantaa inaad dalbato maalmaha bishii ee uu maqan yahay. Maalmaha uu maqan yahay waxaa weeye maalmaha ilmaha ay ahayd inuu yimaado oo uu maqnaa. Tani waxay ku salaysan tahay jadwalka waalidku kula samaysteen oo maaha jadwalka DCYF ugu jira nidaamkeeda. Waxa aad dalban kartaa lacagta maalmo ka badan inta lagu ansixiyay bisha. Marka laga tago in caruurta da'dan waxbarashada ah loo ogolaado gelin si loogu ogolaado in gelin ay dalban karaan dheeraad ah marka ay u baahdaan



daryeel ee ayna tegin dugsiga. "Maalmuhu" waxay ka dhigan yihiin maalmaha caadiga ah iyada oo wax kale lagu sheego moojee. Ogolaanshayaasha qaar ayaa bilaabma kadib maalinta kowaad ee bisha, iyo ogolaanshayaal kale waxay dhamaadaan kahor maalinta ugu danbeeya bisha. Ha dalban maalmaha uu maqnaa ee maalmaha loo ogolaa. Hadii aad go'aansato inaad joojiso inaad siiso daryeelka ilmaha, ma dalban kartid maalmaha uu maqnaa ee maalmaha ka danbeeya taariikhda uu daryeelka ku eeg yahay. "U qorshaysan inuu tago" waxay ka dhigan tahay in ilmaha laga filayay inuu yimaado iyada oo ku xidhan jadwalka hawsha qoysku ansixiyay, oo xaadiriskuna aanu muujinaynin tan dhaaf. Hadii ay xaruntaadu furan tahay Isniinta - Jimcaha (shan maalmood todobaadkii) badanaa bilaha sanadkii, xaruntaadu waxay furnaan doonaa wax ka yar 23 maalmood. Tusaale ahaan: Julaaq, waxa jiri doona 23 maalmood oo noqon doona Isniin - Jimce, oo Agoostana, waxaa jiri doona 22 maalmood.

July							August						
S	M	T	W	T	F	S	S	M	T	W	T	F	S
	1	2	3	4	5	6					1	2	3
7	8	9	10	11	12	13	4	5	6	7	8	9	10
14	15	16	17	18	19	20	11	12	13	14	15	16	17
21	22	23	24	25	26	27	18	19	20	21	22	23	24
28	29	30	31				25	26	27	28	29	30	31

### Ciidaha

Hadii aad doorato inaad xidho ciida aad u qalanto ee mudada lagu ogol yahay ah, waxa aad dalban kartaa xadiga daryeelka ee ilmuhu uu iman lahaa maalintaas. Waxa aad dooran kartaa inaad furto ciida ama aad xidho ciida adiga oo aad isku badasho maalin isku sanad ah.

- Ciidaha u Qalmaa Waa:
  - Sanadka Cusub, Janaayo 1
  - Maalinta Martin Luther King Jr. Isniinta Sadexaad ee Janaayo
  - Presidents Day, Isniinta Sadexaad ee Febraayo
  - Memorial Day, Isniinta Ugu Danbaysa Maay
  - Juneteenth, Juun 19
  - Independence Day, Julaaq 4
  - Maalinta Shaqaalaha, Isniinta Kowaad ee Sebteember
  - Veterans Day, Noofember 11
  - Thanksgiving Thursday, Khamiista Afaraad ee Noofember
  - Native American Heritage Day, Jimcaha Afaraad ee Noofember
  - Christmas Day, Diseember 25
- Hadii aad kaliya furan tahay Isniin ilaa Jimce oo aad u qalanto ciidaha waa:
  - Sabti: Jimcaha ka horeeya ayaa ah fasax u qalama
  - Axad: Isniinta ku xigta ayaa ah fasax u qalma
- Hadii aad furan tahay labada maalmood ee fasaxa todobaadkii, ciida ayaa noqonaysa maalinta fasaxa u qalanta.
  - Sabti ilaa Axada oo maalinta fasaxa ahi waxay noqonaysaa Axad, kadibna waxa aad dalban kartaa Axada inay u qalanto fasax
  - Hadii aad furan tahay maalinta fasaxa u qalanta oo aad doorato inaad dalbato maalinta kale oo fasax ah oo isla sanadka ah ay ciidu ku jirto, waxa aad dalban kartaa maalintaas. Waa inaad xidhaa maalintaas aad dalabtay fasaxa rasmiga ah
  - Hadii aad furan tahay Sabtida ilaa Axada oo ciidu tahay Axada. Waxa aad xidhi doonaa Isniinta maalinta cidaas. Waxa aad dalban kartaa Isniinta inay noqoto maalinta fasaxa ah

laakiin maaha Axada. Ma dalban kartid laba maalmood oo halka maalin ee ciid ee u qalanta

### *Maalmaha Tobobarka Xirfadeed*

Maalinta hormarinta xirfada waxaa weeye maalinta daryeelkaaga ilmuhu xidhan yahay si markaa aad uga qayb geli karto tobobar. Waxa aad dalban kartaan ilaa shan maalmood oo tobobar maalin kasta. Wixii maalmo ah ee ka badan shan maalmood oo tobobar xirfadeed oo aad u xidhan tahay tobobar waxaa loo arkaa inay yihiin maalmo xidhitaan oo ma dalban kartid. Hadii aad u xidhan tahay tobobarka xirfadeed maalinta ogolaanshaha, oo ilmahaaga loo qorsheeyay inuu tago maalinta xidhitaanka, waxa aad dalban kartaa maallintaas.

### *Maalmaha Xidhitaanka*

Waxaa dhici karta in aanad u qalmin bixinta lacagta kaabista maalmaha aad u xidhan tahay sababo kale oo aan ahayn maalmaha fasaxa tobobarka xirfadeed ama ciidaha u qalma.

### *Gunooyinka Saacada Aan Caadiga Ahayn (Nonstandard Hours Bonus, NSHB)*

Saacadaha aan caadiga ahayn waxaa lagu sheegaa:

- Maalmaha saacadaha kahor 6 subaxnimo ama kadib 6 galabnimo.
- Sabti iyo Axad
- Maalmaha fasaxa u qalma

DCYF waxay u ogolaanaysaa \$75 NSHB hal mar bishii ilmaha hadii ilmahaagu u baahan yahay 30 saacadood ama wax ka badan daryeelka caadiga ah.

Waxa aad dalban kartaa NSHB ee ilmaha hadii aad bixiso 30 ama wax aan ka badnayn saacadaha caadiga ah ee daryeelka ilmaha bishaa. Geli "1" "Wadarta Qaybaha" sanduuqa ah ee qaansheegta. Hadii aad bixiso wax ka badan 30 saacadood oo saacadaha aan caadiga ahayn bishaa, ma dalbanaysid NSHB. Geli "0" "Wadarta Qaybaha" sanduuqa ah ee qaansheegta.

Hadii lagu ogolaaday inaad bixiso daryeelka saacadaha aan caadiga ahayn oo ugu yaraan ah 30 saacadood oo daryeel ah mudada NSHB ee bishii, waxaa lagu taliyaa in aad ku dalbato NSHB qaansheegtaada bil kasta ee aad bixisay daryeelka.

Hadii lagu ogolaado bil badhkeed, waa inaad xaqiijisaa in daryeelka aan caadiga ahayn la bixiso bil badhkeed loo ogolaaday in la buuxiyo 30 saacadood ugu yaraan. Tusaale ahaan, hadii ogaanshahaaggu uu bilaabmo 15ka bisha ilaa dhamaadka bisha, waa inaad bixisaa 30 ama wax ka badan oo saacadood oo aan caadi ahayn daryeelka inta u dhaxaysa 15ka iyo ilaa dhamaadka bisha si aad u dalbato NSHB bishaas.

### *Meesha Ka Saarida Aan La Qorshaysnayn*

Mararka qaar, qoysaska ayaa noqda kuwa aan u qalmin daryeelka ilmaha ee la kaabay kahor inta ayna dhamaan mudada loo ogolaaday. Marka ay tani dhacdo, DCYF waxa uu kuu sheegayaa adiga iyo qoyskaaga meesha ka saarida aan la qorshaynin ee daryeelka ilmaha ee isla wakhtiga qoyskaaga la wargeliyay. Hadii lagu siiyay cinwaanka iimeelka ee DCYF, waxa aad heli doontaa wargelin iimeel ah iyo sidoo kale boosta caadiga ah.

DCYF waxa looga baahan yahay 10 maalmood kahor wargelinta qoraalka ah ee meesha ka saarida aan la qorshaynin, oo waxa aad dalban kartaa 10 maalmood. Wargelinta meesha ka saarida waxay gaadhaysaa ilaa bisha xigta, waxa aad dalban kartaa daryeelka maalmaha ilmaha looga fadhiyo inuu dhigto mudadaas 10 ka maalmood ee meesha laga saaray, hadii aanu ilmahaagu iman bishaas.

### *Saacadaha Baahiyaha Gaarka ah*

Waxaa aad eegtaa Qaybta Baahiyaha Gaarka ah ee boga 10 ee tilmaamahan.

### *Kharashka Isduwaan Gelinta*

Hadii aad leedahay siyaasad qoran oo kharashaadka duwaan gelinta aad ka qaado qoysaska is iskaga bixiya, waxa aad ka dalban kartaa \$50 ilmo kasta gobolka ama kharashkaada duwaan gelinta ee aad sheegtay sanadkiiba, kolba kii yar. Hadii aad dalbato kharashka duwaan gelinta sanadkii, la hadal Khadka Bixiyaha si aad u dalbato in dib laguugu ogolaado kharashka duwaan gelinta ee sanad kasta. Waxaa dhici karta in anaad dalban kharash dheeraad ah oo duwaan gelin ah marka ilmuhu uu kusii jiro daryeelkaaga laakiin uu badalo barnaamijyada kaabista. Waxa aad dalban kartaa kharashka duwaan gelinta:

- Marka uu ilmahaagu qaado kaabista marka kowaad ee uu kusoo biirayo daryeelkaaga, xataa hadii aanu ilmahaagu dhigan
- Marka ilmaha qaata kaabitu uu ka baxo daryeelkaaga oo aanu soo noqon wax ka badan 60 maalmood, xataa hadii ay isku sanad tahay.
- Sanad kasta, hadii aad leedahay siyaasad qoraal ah oo shigaysa kharashka is duwaan gelinta aad ka qaado sanadkii dhamaan qoysaska.

Waxaad la hadashaa Khadka Bixiyaha gobolka oo dhan ee 1-800-394-4571 ama iimeel u dir [providerhelp@dcyf.wa.gov](mailto:providerhelp@dcyf.wa.gov) wixii macluumaad dheeraad ah.

### *Ogolaanshaha Adeegyada Halka Mar ah*

Adeegyada halka mar ah waxa ay kuu ogolaanayaan tobobarka ama dib u gudista waxbarashada ama gunooyinka.

## **Gudbinta Dalabka Lacagta**

Waxaa jira dhawr dariiqo oo aad ugu gudbin karto dalabkaaga lacagtaaga DCYF. Kahor inta aanad u gudbin qaansheegtaada, waxa aad buuxisaa qaybaha daryeelka aad siisay ilmo kasta ee qaansheegta, saxeex oo ku qor taariikhda. Waxaa sidoo kale muhiim ah in aad xaqiijiso in xadigu uu saxan yahay oo aad gudbiso sixitaan hadii uu ka badan inta caadiga ah. Hadii xadigu uu ka hooseeyo inta ay ahayd inta uu noqon lahaa, waxa aad u baahan tahay inaad la xidhiidho Kooxda Bixiyayaasha Gobolka oo Dhan. Waa inaad u gudbisaa dalabkaaga lacag bixinta sadex bilood gudahood oo ka bilaabma taariikhda qaansheegtaada.

Gudbi qaansheegtaada adiga oo isticmaalaya **kaliya mid** ikhtiyaarada soo socda:

### *Boosta*

Boosta ugu dir nuqul qaansheegaada aan buuxisay DCYF:  
Washington State Department of Children, Youth & Families  
SSPS  
P.O. Box 45812  
Olympia, WA 98504-5812

### *Taleefanka*

Kala hadal Invoice Express 1-888-461-8855. Tilmaamaha sida loo isticmaalo Invoice Express waxaa laga heli karaa [www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pubs/EPS\\_0043.pdf](http://www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pubs/EPS_0043.pdf).

### *Daaqada Websaytka SSPS*

Tilmaamaha sida loo geli karo ee la isku duwaan gelin karo daaqada bixiyaha websaytka SSPS waxaa laga heli karaa [www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/SSPSPortalRegistration-SAW.pdf](http://www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/SSPSPortalRegistration-SAW.pdf). Waxaa jira sadex qaybood oo ugu muhiimsan oo diyaarinta ah gelitaanka:

- Qaybta 1: Waxaad ka samaysataa xisaab Secure Access Washington (SAW) [secureaccess.wa.gov](http://secureaccess.wa.gov)
  - Hadii aad kala kulanto mushkilad xisaabta SAW, kala hadal adeega macmiilka SAW 24 saacadood maalintii, todoba maalmood todobaadkii, 1-855-928-3241

- Qaybta 2: Isks Duwaan gelinta Daaqada Bixiyaha
- Qaybta 3: Ku Biirida Dhaqan Gelinta Ogolaanshaha

## Helitaanka Lacagta

Dhamaan bixiyayaasha cusub waxaa lacagta toos loogu shubi doonaa xisaabtooda. Hadii aanad haysan hay'ada maaliyadeed, waxa aad usoo gudbin kartaa dalab qoraal ah oo aad ku sheegeyso in aad doorbisayso in boosta laguugu soo diro lacagta Adeega Boosta Maraykanka.

### Boosta

Dalabyada qaansheegta inta u dhaxaysa 1da iyo 4:30 glaabnimo ee 15ka waxaa la soo saari doonaa 16ka ama maalinta kowaad ee shaqo ee ku xigta. Hadii 15ku ku dhaco maalinmaha fasaxa todobaadkii ama ciid, waxaa laga jari doonaa 4:30 galabnimo maalinta shaqo ee ugu danbaysa ee ka horeysa 15ka.

Dalabka qaansheegta la gudbiyo wixii ka danbeeya 4:30 galabnimo ee 15ka ilaa 4:30 galabnimo ee maalinta shaqo ee ugu danbeeya bisha waxa lasoo saari doonaa maalinta kowaad ee shaqo ee xigta ee bisha.

Lacagta waxaa lagu bixin doonaa boosta e geli Adeega Boosta Maraykanka ilaa sadex maalmood oo shaqo kadib marka laga shaqeeyo. DCYF ma damaanad qaadi doonto taariikhda keenista jeegaga ee lagu soo diray Adeega Boosta Maraykanka.

Waxa aad ka geli kartaa taariikhda si aad u muujiso taariikhda dalabka iyo damaanada u dhiganta (jeega) taariikhda lasoo dhitay [www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/SSPS-WarrantIssuanceCalendar.pdf](http://www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/SSPS-WarrantIssuanceCalendar.pdf).

### Toos Ugu Shubid

Dalabka qaansheegta loosoo gudbiyay lacagta tooska loogu shubayo waxaa laga shaqayn doonaa maalinta ugu danbaysa bisha qaansheegta la diray ama taariikhda la gudbinayo, kolba ta danbaysa. Lacagta tooska loogu shubay 3-5 maalmood oo shaqo kadib taariikhda laga shaqaynayo qaansheegta.

Wixii xisaabta kaydinta tooska ah ama inaad ku samayso wax ka badal xisaabta aad hore u lahayd, waxa aad marka hore buuxin kartaa Duwaan Gelinta Ku Shubida Tooska ah/foomamka W9 ee elektorooniga (lagu heli karo onleyn ah [www.dcyf.wa.gov/services/ssps/direct-deposit](http://www.dcyf.wa.gov/services/ssps/direct-deposit)), oo waad daabacan kartaa oo waxa aad boosta ama faakis ugu diri kartaa foomka:

SSPS Provider File Unit  
P.O. Box 45812  
Olympia, WA 98504  
Faakiska: 360-902-8268

Dalabka nuqulka waraaqaha ah ee bushaqada arjiga ku jir [DSHSSPSWeb@dshs.wa.gov](mailto:DSHSSPSWeb@dshs.wa.gov) ama la hadal 360-664-6161 (Ikhtiyaar 1). Inaad xaqiijiso inaad u sheegto SSPS hadii ay tahay xisaab cusub ama aad badalayso xisaabta hore.

*Miyaad u baahan tahay in lagaa caawiyo buuxinta foomamka?* Akhri Tilmaamaha Isduwaan Gelinta Ugu Shubida Toos ah onleyn ahaan [ofm.wa.gov/it-systems/accounting-systems/statewide-vendorpayee-services/vendorpayee-direct-deposit](http://ofm.wa.gov/it-systems/accounting-systems/statewide-vendorpayee-services/vendorpayee-direct-deposit).

## Xadiga Daryeelka Ilmaha Laxaadka La'

Xadiga baahiyaha gaarka ah waxaa loogu talo geley daryeelka aad siiso ilmaha leh baahiyaha gaarka ah ee kor lagu sheegey ee ka badan daryeelka maalintii ee caadiga ah. DCYF ma bixiso lacagta tobobarka, waxka badalka dhismaha, ama agabka.

Waxaa lagu siin karaa xadiga dheeraad ah oo daryeelka ah caruurta iyo dadka dhalinyarta ah:

- a. Dadka ilaa da'da 19 ee la xaqiijiyay xaaladooda jidh, maskaxeed, dareen ama habdhaqan ee u baahan heer sare oo daryeelka gaarka ah; ama
- b. Da'da 13 ilaa 19 oo ay maxkamadu amartay

Daryeelka ilmaha laxaadka la' waxaa loo ansixiyay Heerka 1 ama Heerka 2. Xadiga laxaad la'aanta waxaa la bixiyaa oo uu ka dheeraad yahay xadiga maalin kasta ee daryeelka ilmaha iyo qaansheegta isla tirada saacadaha aad siiso qaybaha kuwa aan laxaadka la'ayn.

## Heerka 1

Heerka 1 ee ogolaanshaha waxaa weyee xadi baahiyo gaarka ah oo gobolka ah. Kahor Heerka 1 ee baahiyaha gaarka ah inta aan la ansixin, adiga iyo qoyskaagu waa inaad buuxisaa foomka Dalabka Xadiga Daryeelka Ilmaha Laxaadka La', waxaa lagu heli karaa onleyn ahaan

[www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/word/Special\\_needs\\_request.docx](http://www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/word/Special_needs_request.docx). Foomka waa in la saxeeexo oo loogu diro boosta ama faakis DCYF:

Child Care Subsidy Contact Center  
P.O. Box 11346  
Tacoma, WA 98411-9903  
Faakiska: 1-877-309-9747

## Heerka 2

Qoysku waxa uu kaala shaqaynayaa adiga iyo DCYF si loo ogaado hadii ilmahoodu uu qalmo Heerka 2 ee xadiga laxaadka la'aanta. Marka laga tago foomamka Dalabka Xadiga Daryeelka Ilmaha Laxaadka La', DCYF waxaa inay ka heshaa foomka xaqiijinta oo qoran caafimaadka, caafimaadka maskaxda, adeega bulshada, ama xirfadlayaal waxbarasho ugu yaraan heerka maasterka ama kaaliya caafimaad oo duwaan gashan. Xaqiijinta waa in lagu sharaxaa heer dheeraad ah oo daryeelka gaarka ah ee buuxinta daryeelka ilmaha oo ka sareeya oo ka badan waxa aad siinayso caruurta iyada oo aanay jirin laxaad la'aani.

## Khaladaad Bixinta Lacagta

Wakhtiga adiga ama gobolka laguu siiyay ay tahay inaad saxdaan wixii khalad lacagta ah ama inaad dalbataan dib u qaadashada lacagtu waa:

- Laba sano hadii khaladku uu yahay xadiga la siiyay da'da ama deegaanka. Xadigan labada sano ah ma khuseeyo hanti dhawrka federalka, taas oo noqon kartaa ilaa sadex sano oo hore
- Ilaa sadex sano hadii khaladku oo yahay hal shay oo kaliya

## Khaladaad Lacag Yar Siin ah

Lacag yar bixintu waxay timaadaa maadaama oo uu khalad ka dhacay qaansheegta, hadii aanad helin lacagta waxa kasta ee aad dalbatay ee qaansheegta kuugu qoran ama hadii xadi khaldan lagu siiyay.

Raac tilmaamaha hoose:

1. Waxa aad la eegtaa qaansheegtaada duwaankaaga si aad u aragto hadii magaca ilmuhu uu ku qoran yahay qaansheegta
2. Waxa aad is barbar dhigtaan duwaanada xaadirista ee qaansheegtaada si aad u aragto hadii aad qaadan lacag kugu filan
3. la hadal Khadka Bixiyaha ee 1-800-394-4571 si aad ugu sheegto in lacag yar lagu siiyay

Si aad u saxdo lacagta yar ee aad qaadatay, waa inaad u soo gudbisaa qaansheeg lacagta ah gobolka adeegyada daryeelka ilmaha wakhti aan ka danbaynin sadex bilood kadib taariikhda qaansheegta.



## Khaladaad Lacag Badan Siin

Hadii lagu siiyo lacag ka badan intii ay ahayd in lagu siiyo maadaama oo:

- Aanad isticmaalin nidaamka xaadiriska elektorooniga ah DCYF ama aanad lahayn wax laga soo reebey oo la ansixiyay
- Aanad lahayn duwaanada xaadiriska oo ay is waafaqsan yihiin duwaankaaga sheegashada (WAC 110-15-0034)
- Aad heshey lacagta xadi khaldan
- Aanad haysan risiidh sax ah oo aad lacagtaada ku xoojiso
- Kharashka aad sheegtey laguma sheegey waraaqahaga tilmaamaha

1. Hadii aad ka shakisan tahay in aad qaadatay wax ka badan intii ay ahayd inaad qaadato, la hadal Khadka Bixiyaha ee 1-800-394-4571 ama iimeel u dir [providerhelp@dcyf.wa.gov](mailto:providerhelp@dcyf.wa.gov). Waxa ay ka gaysan karaan gacan xalinta khaladka kahor inta DCYF ayna samaynin lacag dheeraad bixinta rasmiga ah ee Office of Financial Recovery (OFR).
2. DCYF waxay la socotaa lacagta daryeelka ilmaha wixii khaladaad ah ee iman kara. Si aad u ogaato hadii khaladku uu saxan yahay, DCYF waxay qiimayn doontaa xaadirista ama waxay ku waydiisan kartaa inaad bixiso nuqulo duwaanadaada ah. Marka ay dalbato DCYF, waa inaad soo gudbisaa risiidhada 45 maalmood gudahood marka aad dalbato. Waxaa muhiim ah inaad ka jawaabto wixii dalab ah ee duwaanadaada xaadiriska ah. Waxa aad la xidhiidhi kartaa waaxda oo waxa aad dalban kartaa duwaanada adiga oo la tixraacaya macluumaadka xidhiidhka ee ku daabacan dalabka.
3. Hadii khaladka la ogaado inuu sax yahay oo lacag badan in la bixiyay la ogaado, waxaa lagu soo diri doonaa Wargelinta Lacagta Badan Siinta Qandaraaslaha oo kaaga imanaysa OFR. Waxaa taas kamid ah:
  - a. Sababta, nooca lacagta dheeraad ah, caruurta ay khusayso, iyo mudada lacagta dheeraadka ah la bixiyay
  - b. Tilmaamaha sida aad dib ugu gudooyso xadiga lacagta dheeraadka ah (qorshayaasha lacagaha waxaa laga heli karaa)
  - c. Tilmaamaha lagu sheegey sida loo qaybinayo lacagta dheeraadka ah. Waxa aad la xidhiidhi kartaa waaxda ogaatay in lacag dheeraad ah la bixiyay (ka eeg wargelinta lacagta dheeraadka ah wixii macluumaadka xidhiidhka ah) xalka, oo waxa aad sidoo kale dalban kartaa Dhagaysi Maamulka si aad uga doodo lacagta dheeraadka ah. Si aad u dalabto dhagaysiga, waa inaad:
    - i. Waxa aad kusoo dirtaa dalabkaaga qaansheegta boosta haysata shahaadada ee leh risiidhka ama qaab kale oo leh risiidh ay OFR ansixisay.
    - ii. Waxa aad xaqiijisaa in dalabka dhagaysiga ay heshey OFR 28 maalmood gudahood oo ka bilaabanta taariikhda aad heshey Wargelinta Lacagta Badan Siinta Qandaraaslaha.
    - iii. Waxa aad raacisaa sababta aad ugu malaynayso in lacagta badan ee lagu siiyay inay u khaldan tahay oo waxa aad raacisaa nuqulka Wargelinta Lacagta Badan ee Qandaraaslaha la siiyay. Hadii lacagta dheeraadka ah aan lagu xalin marka lala hadlo shaqaalaha Khadka Bixiyaha DCYF ama dhagaysiga maamulka, waa inaad gudaa lacagta.
4. Kadib marka Wargelinta Lacagta Badan ee Qandaraaslaha laguugu soo diro boosta shahaadada haysata ama adeega shakhsi ahaaneed, OFR waxay bilaabi doonaa talaabada ay lacagteeda ku qaadanayso kadib ugu yaraan 30 maalmood. Hadii aad dalbato dhagaysi wax ka badan 28 maalmood kadib marka ay wargelintu ay kusoo gaadho, ficilkani ma joogsanayo inta lagu jiro nidaamka dhagaysiga.

5. Wargelin kasta oo lacagta dheeraad ah ee la isasiyo waxaa weeye dhacdo gaar ah. Waa inaad dalbataa dhagaysiga talaabo kasta oo aad doonayso inaad ka muranto. Waa inaad heshaa wargelin dheeraad ah oo lacagta dheeraadka ah adiga oo sugaya hal ama wax ka badan oo dhagaysi ee nidaamka dhagaysiga.

Marka la gudayo lacagta dheeraadka ah ee la isasiyay, waxaa muhiim ah in loo sheego Tax Desk si loo xaqiijiyo inay la socdaan oo ay isbadalka loo baahan yahay ugu samayn karaan warbixinta cashuurta. Ka eeg *Macluumaadka Cashuurta* qayb ah wixii macluumaadka saxda ah.

## Ka Qaadida Kharashka Adeegyada Aan Loo Ogolayn Qoysaska

Waxa aad ka qaadi kartaa qoysaska qaata kaabista daryeelka ilmaha wixii adeegyada soo socda ah kaliya hadii aad leedahay siyaasad qoran oo dhigaysa in laga qaado qoysaska gaar iskaga bixiya.

- Daryeelka ilme oo dheeraad ah sababo shakhsi ahaaneed, sida balamo shakhsi ahaaneed oo aan hoos iman ogolaanshaha
- Kharashaadka safarka shaqo
- Barnaamijyada cuntada ikhtiyaarka ah ee aad siiso qoysaska aan siinin qadada ilmahooda
- Gaadiidka dugsiya ama hawlaha lagu imanayo ama lagaga tagayo
- Ka kaxaynta wakhtiga danbe ilmaha saacadaha shaqo kadib
- Kharashka habsaanka ee qaybta qoyska laga qaado daryeelka ilmaha
- Kharashaadka lacag ku filan la'aanta (Non-sufficient funds, NSF) ee uu qaadi bangiga marka lacag ayna ku jirin

Wax lacag ah ka qaadi maysid qoysaska qaata daryeelka ilmaha ee kaabista leh:

- Kharashaadka bixinta kharashka marka uu ka badan yahay kharashka isduwaan gelinta ugu badan ee barnaamijka kaabista
- Kharashaadka hawlaha nidaamka bixinta lacagta qoyska
- Kharashaadka alaabaadka, agabka ama qalabka loogu baahan yahay shuruudaha liisanka si loo buuxiyo
- Kharashaadka dalabyada muranka ee adiga iyo gobolka idiin dhaxaysa
- Maalmaha aad xidhan tahay

## Siyaasadaha Qoran

Waa inaad leedahay siyaasad qoran oo lagu faahfaahiyay xadiga kharashka ee dhamaan adeegyada iyo kharashaadka. Kharashaadka qoysaska gaar iskaga bixiya waa inay is waafaqaan kharashaadka qoysaska la kaabay.

Marka ay dalbanayso DCYF, waa inaad soo gudbisaa nuqulka siyaasada ee qoran 45 maalmood marka aad dalbato. Haddii aanad ku keenin nuqul 45 maalmood, xadiga lacagta dheeraadka ah waxaa dhici karta in lagugu qoro xadiga oo dhan ee aad dalbatay mudadaas.

## Macluumaadka Cashuurta

DCYF waxay boosta ku dirtaa duwaanka lacagta ee loo yaqaan Talada Xawilaada (Remittance Advice). Waxaa taas kamid ah liiska waxyaabaha laga jarayo ee loo adeegsan karo ujeedooyinka cashuurta, oo ay ku jiraan wixii la dhaafiyay. Haddii qof ama shirkad ay doonayso inay xaqiijiso dakhligaaga, waxa aad siin kartaa talada xawilaada. Macluumaadka qaar ku yaal talada xawilaada waa sir oo waa in aan loo sheegin cidna. Waxa uu lamid yahay risiidhka lacag bixinta oo kale.

Hadii aad u baahan tahay wax kale oo ka dheeraad ah talada xawilaada, waxa ka aad dalban kartaa foomka "cadaynta dakhliga" DCYF. Waxa aad dalabkaaga qoraalka ah u dirtaa:

SSPS Attn: Evidence of Income  
P.O. Box 45812  
Olympia, WA 98504-5812

limeelka: [SSPSvoe@dshs.wa.gov](mailto:SSPSvoe@dshs.wa.gov)  
Faakiska Xaqiijinta Mushaharka: 360-664-6103

DCYF kama haysato cashuurta lacagta ay DCYF bixinayso. Warbixinaha DCYF ee dakhliga aad ka anaka naga heshey waxaa loo diraa Adeegyada Dakhliga Gudaha (Internal Revenue Service, IRS). Waxaa lagu soo diri karaa foomka W-2 wixii ujeedo cashuur ah. Hadii aad qabto su'aalo cashuureed, fadlan waxa aad la xidhiidhaa IRS. Wixii macluumaad ah ee ku saabsan bayaanka cashuurta:

La Hadal Taleefanka Bilaashka ah: : 833-725-3502, ikhtiyaarka 1  
limeelka: [dcyf.taxreporting@dcyf.wa.gov](mailto:dcyf.taxreporting@dcyf.wa.gov)

## Ku Xadgudubka Barnaamijka

Sida uu dhigayo WAC 110-15-0277, bixiyayaashu waa inay u hogaansamayaan dhamaan masuuliyada lagu qoray WAC 110-15-0034, oo ay ku jiraan dalabyada saxda ah. Hadii aad sidaa samayn waydo waxay keeni kartaa ku xad gudub barnaamijka ah, oo xariyaad ayaa la saari doonaa sida lagu sheegey WAC 110-15-0279.

## Early Achievers

Early Achievers ee daryeelka ilmaha Washington waxa uu u qiraa tayada iyo nidaamka hormarinta. Bixiyayaasha waxaa la siiyaa qiimayn 1 ilaa 5 ah. Bixiyayaasha daryeelka ilmaha ee liisanka haysta ee ka qayb gala Early Achievers waxay heli karaa Qaybo Dheeraad ah oo Gudis ah kuwaasoo ah boqolkiiba xadiga kaabista bishii. Waxaa taas kamid ah boqolkiiba gelinka iyo maalinta dhan ee daryeelka kaabista ay dalbadeen bixiyayaashu. Kuma jiraan kharashaadka safarada shaqo, gunooyinka saacadaha aan caadiga ahayn, baahiyaha dheeraadka ah, ama korodhka ama gunoyinka kale. Gudista Qaybaha Early Achievers waxaa loo bixiyaa si gaar ah oo ka duwan bixinta lacagta la dalacay.

Wixii bixiyayaal ah ee qaata lacagta kaabista wixii ka danbeeya 12 ama wax ka badan oo aan la aqbalin kaabista waxaa loo arkaa bixiya kaabista cusub. Waxaa taas kamid ah bixiyayaashs liisanka haysta ee cusub. Dhamaan bixiyayaasha cusub waa inay buuxiyaan shuruudaha soo socda:

- Waa inuu ku jiraa Early Achievers 30 ka maalmood ee uu qaadanayo lacagta kaabista ee kowaad
- Waa inuu buuxiyaa Macluumaadka Barnaamijka Hore 12 bilood gudahood marka uu ku biiro Early Achievers ama lacag bixinta kowaad, kolba ka danbe.
- Soo Koobista Heerka Tayada 3 ama ka sareeya 30 bilood gudahood oo marka Early Achievers lagu biiro ah ama lacag bixinta kowaad ee kaabista, kolba ka danbeeya. Barnaamijka waxbarashada hore ee aan keenin heerka u qalanka mudada uma qalmo inay helaan kaabista daryeelka ilmaha ee gobolka ilaa inta heerka taydaa loo baahan yahay la buuxinayo
- In la hayo barnaamij waxbarashada hore oo wax kastaaba buuxiyay Heerka Tayada 3 ama wax ka sareeya si loo dhamaystiro Wareega Aqoonsiga Tayada sadexdii sanoba mar

Bixiyayaasha kaabista ee hela Heerka Tayada 2 waa inay buuxiyaan hawlaha loo qoray oo ay soo afjaraan Heerka Tayada 3 ama wax ka sareeya 12 bilood ee lasoo dhaafay oo ka bilaabma hawlaha loo qoray. Bixiyayaasha kaabista qaata ee hore waxaa dhici karta inayna yeelan Heerka Tayada 3 ama ka sareeya oo lasoo afjaray 12 bilood gudahood marka ay bilaabmaan hawlaha loo qoray kuwaas oo aan u qalmin inay helaan qaybta kaabista daryeelka ilmaha ee gobolka ilaa inta heerka tayada ee loo baahan yahay la buuxinayo.

Ka oggow macluumaad dheeraad ah Early Achievers [www.dcyf.wa.gov/services/earlylearning-childcare/early-achievers](http://www.dcyf.wa.gov/services/earlylearning-childcare/early-achievers).

## Khayraadyada

### Macluumaadka Xidhiidhka

<b>Reporting Abuse and Neglect</b> 1-866-ENDHARM 1-866-363-4276 <a href="http://www.dcyf.wa.gov/safety/report-abuse">www.dcyf.wa.gov/safety/report-abuse</a>	<b>Answer Phone for Families</b> <i>Qoysaska loo ogol yahay WCCC ama SCC waxay ka eegi karaan xaalada kiiskooda iyaga oo riixaya 1 kadib marka lasoo hadlaan Xarunta La hadalka Adeega Macmiilka DCYF</i> 1-844-626-8687	<b>Qaybta Eegitaanka Taariikhda DCYF</b> 1-866-482-4325, ikhtiyaar 4 <a href="mailto:backgroundcheck@dcyf.wa.gov">backgroundcheck@dcyf.wa.gov</a>
<b>Xarunta La Hadalka Macmiilka DCYF</b> <i>Qoysasku waxay dalban karaan adeegyo ama waxay soo sheegi karaan isbadalo</i> 1-844-626-8687 Faakiska: 1-877-309-9747	<b>Xaadiriska Elektorooniga ah ee DCYF</b> 1-844-704-6777 <a href="mailto:eas.servicedesk@dcyf.wa.gov">eas.servicedesk@dcyf.wa.gov</a> <a href="mailto:electronic.attendance@dcyf.wa.gov">electronic.attendance@dcyf.wa.gov</a>	<b>DSHS Invoice Express</b> 1-877-461-8855
<b>Adeega Macmiilka SSPS</b> 360-664-6161 <a href="mailto:dshs_sspsmail@dshs.wa.gov">dshs_sspsmail@dshs.wa.gov</a>	<b>Daaqada Bixiyaha SSPS</b> 1-855-928-3241	<b>Khadka Bixiyaha WCCC</b> 1-800-394-4571 Faakiska: 1-877-309-9747 <a href="mailto:providerhelp@dcyf.wa.gov">providerhelp@dcyf.wa.gov</a>
<b>Office of the Superintendent of Public Instruction</b> <i>Waxa uu bixiyaa deeq lacageed oo fedetal ah oo lagu bixiyo cunto nafaqo leh oo lana soo mariyo Barnaamijka Cuntada Daryeelka Ilmaha</i> 360-725-6206	<b>Office of Financial Recovery</b> SHS Economic Services Administration, Office of Financial Recovery, P.O. Box 9501 Olympia, WA 98507-9501 360-664-5700 Taleefan Bilaash ah: 1-800-562-6114 TTY: 1-800-833-6388	

### Macluumaadka Onleynka ah

- Shuruudaha Liisanka Guriga Haysta ee Daryeelka Ilmaha: [www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/licensed-provider](http://www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/licensed-provider)
- Xadiga Kaabista Daryeelka Ilmaha: [www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/Subsidy\\_regions\\_map\\_chart.pdf](http://www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/Subsidy_regions_map_chart.pdf)
- Shuruudaha iyo Shuruucda Kaabista Daryeelka Ilmaha: [apps.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110-15](http://apps.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110-15)
- Macluumaad Nidaamka Xaadiriska Elektorooniga ah: [www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/electronic-attendance-system](http://www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/electronic-attendance-system)
- Tobobarka Nidaamka Xaadiriska Elektorooniga: [www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/electronic-attendance-system/training](http://www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/electronic-attendance-system/training)
- Qoysasku Waxay ka Dalban Karaan: [www.washingtonconnection.org](http://www.washingtonconnection.org)
- Macluumaadka Invoice Express: [www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pubs/EPS\\_0043.pdf](http://www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pubs/EPS_0043.pdf)
- Liisaka iyo Shuruucda Kaabista: [apps.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110](http://apps.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110)
- Xadiga Gudista OFM Mileage: [www.ofm.wa.gov/policy/10.90a.pdf](http://www.ofm.wa.gov/policy/10.90a.pdf)
- Secure Access Washington (SAW): [secureaccess.wa.gov](http://secureaccess.wa.gov)

- Taageerada Goobta: [support/secureaccess.wa.gov](https://support/secureaccess.wa.gov)
- Dalabka Xadiga Baahiyaha Gaarka ah:  
[www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/word/Special\\_needs\\_request.docx](https://www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/word/Special_needs_request.docx)